

Jawaab celinta COVID-19

Tilmaamaha Caafimaadka iyo Badqabka Adeegyada CTC

WAXAA LA CUSBOONEYSIIYAY 1 DA AGOOSTO, 2021

CTC da Qoysaska:

Inta lagu jiro xanuunka aafada ah ee COVID-19, Xarunta Daaweynta Carruurta waxay ka shaqeyneysaa inay ballaarisoo adeegyada qoysaska ee ay dadku sida tooska ah u imaanayaan iyadoo sii wadaysa bixinta adeega caafimaadka taleefanka lagu sameeyo oo ikhtiyaar ah. Si loo ilaaliyo caafimaadka qof walba, **waxaan haysanaa shuruudahaan soosocda ee loogu talagalay in lagu saleeyo adeegyada toos ah waqti kasta:**

- Isla markiiba nala soo xariir haddii adiga ama ilmahaagu dareemo astaamaha xanuunka, haddii uu idinsoo gaaray COVID-19, ama haddii qof katirsan qoyskaaga uu helay natiijo baaritaan oo muujinaysa inuu qabo COVID-19.
- Ha aqbalin ama ha aadin booqashooyinka sida tooska ah loo tagaayo haddii aad qabto COVID-19. Mar labaad ayaan qaban doonaa balantaada anagoo ka dhigayna adeega caafimaadka taleefanka.

Si loo yareeyo tirada dadka booqashada ku imaan kara:

- Kaliya shaqaalaha CTC ayaa ka qaybgali doona kulankaaga daaweynta.
- Fadlan xadid tirada xubnaha qoyska ee aan daruuriga ahayn ee ka qeybgalaaya kulankaaga; walaalaha ku soo biiraya kulanka waa in uu qof wayn ku sameeyo kormeer.
- Inta badan turjumaanada waxay kulanada oga qaybqaadan doonaan qaab muuqaal ah.

Waxaa naga go'an inaan taageerno cunugaaga iyo qoyskaaga anagoo u marayna habka ugu amaansan ee suurtagalka ah. U hogaansanaanta filashooyinka waa shuruud u degsan dhammaan adeegyada shaqsiyaadka oo ayna ku jiraan adeegyada xarumaheenna, kuwa guriga, iyo goobaha bulshada.

Fadlan la xariir adeeg bixiyahaaga haddii aad qabto wax su'aalo ah.

Soo degso Shuruudaha Caafimaadka iyo Badqabka ee loogu Talagalay Adeegyada